

# FAAFINTA RASMIGA AH

الرسالة الرسمية



# الجريدة الرسمية

JAMHURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهوريّة الصومال الديمُقراطِيّة

Sannadka 9aad Muqdisho, 1 Sebt. 1981 L. 9

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. 5

QIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100 Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo geeyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaaka qoritaanku F.R. balkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 45 ee 15 Luulyo 1981, Oggolaansho Meelmarin heshiis iyo brotokool dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuriyadda Hantiwadaagga ah ee Romaniya. Bogga 1375

SHARCI L. 45 ee 26 Luulyo 1981, Meelmarin Heshiis. » 1377

LAW N. 45 on 26th July 1981, Instrument of Ratification. » 1378

WAKAALADDA M. QARANKA

SHARCI L. 46 ee 26 Luulyo 1981, Xeer-Sharci kuna saabsan Dib u habeynta Qaabka dhismaha Tariifada Furdada iyo wax ku kordhin Canshuuraha Fur-dada.

» 1379

SHARCI Lr. 47 ee 18 Agoosto 1981, Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta.

» 1384

SHARCI Lr. 47 ee 6 Sebt. 1981, Meel marin Heshiis.

» 1386

LAW No. 47 on 6th Sept. 1981, Instrument of Ratification.

» 1387

SHARCIL. 48 ee 28 Luulyo 1981, Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa H. Sacuudiga.

» 1388

SHARCI L. 48 ee 18 Agoosto 1981, Meelmarin Heshiis.

» 1390

قانون رقم ٤٨ الصادر في ١٨ أغسطس ١٩٨١

١٣٩١

وثيقة التصديق

SHARCI L. 49 ee 23 Agoosto 1981, Oggolaansho Xisaabxirka miisaaniyadda dhabta ah ee 1981.

» 1392

SHARCI L. 50 ee 20 Luulyo 1981, Meelmarin Dastuurka UNIDO.

» 1396

LAW N. 50 on 20th July 1981, Instrument of Ratification.

» 1397

QAYBTA LABAAD  
XEER

W. M.

TALOOYIN ISGAARSIIN OG. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA G. TOGDHEER «BUR-CO», 28.6.81, Lumid Jeeg War.  
L. 50135 oo ku qoran Cali Ibraahim »

1398

QAYBTA            KOOWAAD  
SHARCI

SHARCI lambar 45, taariikh 15 Luulyo 1981, Oggolaanshaha Guddiga iyo brotokool dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Hantiwadaagga ee Romaniya.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta heshiiska iyo Brotokoqlka dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Hantiwadaaga ee Romaniya oo ku saabsan horumarinta dhaqaalaha iyo iskaashiga xagga teknikada.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada Bucharest ee Dalka Romaniya taariikhdu markay ahayd 13 Oktoobar 1980, Brotokoolka la xiriirana waxaa lagu kala saxiixday magaalada Muqdisho, taa-raakhdu markay ahayd 1 Febraayo 1981.

3. Heshiiska iyo Brotokoolka waxay ka mid noqonayaan Sharcigan iyagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan heshiiska iyo brotokoolka la xiriira waxay leeyihiiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqangelintooda la waafajinayaas Das-tuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey in uu  
meelmariyo Heshiiska iyo Brotokoolka ku tilmaaman  
Sharcigan, sida uu qabo Qod. 82aad ee Dastuurka JDS.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa Sharciyada  
iyo Xeerarka Dalka, wuxuuna dhaqangelayaa isla  
maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jam-  
huuriyadda.

Muqdisho, 15 Luulyo 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 45 ee 26 Luulyo 1981, Meelmarin Heshiis:

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY: Qod. 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Heshiiska iskaashiga Dhaqaalaha iyo Farsamada ee dhexmaray Dawladda JDS iyo Dawladda Hantiwadaagga ee Roomaaniya laguna kala saxeexday Magaalada Bukhareesti 13kii Oktoobar, 1980; iyo Brotokoolka la xidhiidha ee lagu kala saxeexday magaalada Muqdisho, 1dii Feberaayo, 1981;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga Qaranka ee Heshiiska taariikhdiisuna ahayd 9kii Juun 1981.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerkan soo socda:

Qod. 1aad

Heshiiska Iskaashiga Dhaqaalaha iyo Farsamada ee dhexmaray dawladda J.D.S. iyo dawladda Hantiwadaagga ee Roomaaniya laguna kala saxeexday Bukhareest 13kii Oktoobar, 1980; iyo Brotokoolka la xidhiidha ee lagu kala saxeexday Muqdisho, 1dii Feberaayo, 1981, WAA LA MEELMARIYEY.

Qod. 2aad

Heshiisku iyo Brotokoolka la xidhiidha waxay ku yeelan doonaan J.D.S. astaan sharci ah.

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxeexo Madaxweynaha Jamhuuiryadda Dimoqraadiga Soomaaliya; waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 26 Luulyo 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.  
(Maxamed Siyaad Barre)

LAW No. 45 on 26th July 1981, Instrument of Ratification:

and Article 72 para 1 of the Constitution of the So-

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: Article 67 para 5, Article 82 para 4  
mali Democratic Republic;

HAVING SEEN: Agreement regerding on Economic &Technical Cooperation between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the Socialist Republic of Romania, signed at Bukharest on 13th October, 1980; and relating Protocol singed at Mogadishu on 1st. Feb. 1981;

TAKING NOTE: Of the approval of the People's Assembly of the said Agreement and Protocol dated 9th June 1981.

Hereby promulgates the following Decree:

Article I

The Agreement regerding on Economic and Technical Cooperation between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the Socialist Republic of Romania signed at Bukharest on 13th October, 1980; and the Related Protocol signed on 1st. Feb. 1981, IS HEREBY RATIFIED.

Article II

The Agreement and the Related shall have force of law in the territory of the Somali Democratic Republic.

This Decree shall enter into force upon signature by the President of the Somali Democratic Republic; and shall be published in the Official Buletin of the State.

Mugadishu, 26.7.1981

PRESIDENT OF THE SDR  
(Major General Mohamed Siad Barre)

XEER—SHARCI L. 46 ee 26 Luulyo 1981, Xeer-Sharci kuna saabsan Dib u habeynta Qaabka dhismaha Tariifada Furdada iyo wax kordhinta Canshuuraha Furdada:

IL PRESIDENTE DELLA REPUBLICA  
MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 69 ee Dastuurka J.D.S;

ISAGOO GARAWSADAY: Inay duruuf degdeg ah leedahay wax ka beddelidda Tacriifada Canshuurta Furdada;

IYADOO UU: soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Ra'yiga Golaha Wasiiradda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka-Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Badeecooyinka ku tixan lifaaqyada B & T ee Xeer-Shacigan waxaa lagu cashuuraya qiiimaha (Ad Volorem), sida mid waliba ku hor qoran.

2. Sidaas oo kale laga billaabo 30.6.1981, dhammaan badeecooyinka Waddanka laga soo dejiyo ama laga dhoofiyo (import & export) waxaa lagu cashuuraya qiiimaha (Ad Valorem).

Qod. 2aad

1. Waxaa la burriyey sharci kasta ee kan ka soo horjeeda ama aan la socon karin;

2. Xeer-Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 30.6.81, waana in loo gudbiyo Golaha Shacbiga si loo rasmiyeeyo.

MADAXWEYNAHA JDS  
(Maxamed Siyaad Barre)

LIFAAQ B

I M P O R T A Z I O N E

VOCE DELLA TARIFFA	DENOMINAZIONE DELLA MERCE	DAZIO VALORUM
10.05	Granaturco	9,15 %
10.06	Riso USA & Pakistan	3,20 %
	» Siam & Bankok	4,00 %
	» Cina & Korea	5,70 %
	» Europea	5,00 %
	» di altri origine	5,00 %
10.07/01	Dura bianca	10,00 %
10.07/02	» Rossa	11,15 %
11.01/10	Farina di frumento	64,15 %
12.07/01	Qaadka merowga ah	73,35 %
» »	» hareeriga ah	110,00 %
17.01/11	Zucchero	211,20 %
27.10/01	Benzina comune	45,05 %
27.10/21	Petrolio illuminazione	7,30 %
27.10/22	Av.Gas	31,95 %
» »	» »	41,95 %
27.10/50	Nafta chiara	24,20 %
» »	» scura	28,50 %
27.10/60	Olio lubrificante	8 %
	Sigaarka	
	Benson & Hedges	245,70 %
	Rothmans	204,40 %
	Galleyr	46,30 %
	Ubax	59,60 %
36.60	Tarraq	18,90 %

LIFAAQ T

E S P O R T A Z I O N E

VOCE DELLA TARIFFA	DENOMINAZIONE DELLA MERCE	DAZIO VALORUM
01.02/00	Bovine	25%
01.04/01	Pecore	25%
01.04/09	Capre	25%
01.06/01	Cammelli	25%
05.09/00	Corno di rinoceronte	10%
05.10/00	Avorio greggio	37,50%
41.01/01	Pelli di Bevini salate: 1° qualità	11,25%
	2° »	12,85%
	3° »	18%
	3° »	45%
	Pelli di Bevini non salate: 1° qualità	15%
	2° »	18%
	3° »	30%
	4° »	37,5%
41.01/03/04	Pelli di capre e pecore salate: 1° qualità	5,60%
	2° »	6,90%
	3° »	9%
	4° »	45%
41.01/03/04	Pelli di capre e pecore non salate: 1° qualità	5%
	2° »	7%
	3° »	11,25%
	4° »	45%
41.01/05	Pelli di cammello salate o sacche: 1° qualità	8,75%
	2° »	11,65%
	3° »	21%
43.02	Pelli di Leopardi	100%
44.01	Legno da ardere	30%
44.02	Carbone di legno	65%

XOOLAHADUUR KU NOOLKA AH

10.06.10	Buflalo	25%
10	Giaraffe	25%
13	Damalisco-Corrigum	25%
14	Silvivepra rossa	25%
15	Damalico Hunter	30%
16	Dig-Dig	5%
17	Orbi e Gazzella di sciamba	5%
18	Saltarupe	20%
19	Cobo e Balanca	20%
20	Dibatag e Antilope di Clark	20%
21	Gazzella di Grant	20%
22	Gazzella di semmering	20%
23	Gazzella di Speko	20%
24	Orige e Ori	20%
25	Tragofalo	20%
26	Pieccolo kudo	20%
27	Ippopotamo	100%
28	Elefante	100%
29	Petamocar e cinghiale	30%
30	Rinocerente	100%
31	Facocero	30%
32	Beyra	60%
33	Zebbra	30%
34	Leone	10%
35	Leopardi	10%
36	Gattopardo	60%

37	Ghepardo	80%
38	Lince	30%
39	Gatto selvatico	30%
40	Iena	30%
41	Canidi (licanone, scacallo)	30%
42	Mutelidi Melivera	20%
43	Vicerridi Ignemoni	20%
44	Orittero e Formichiere	30%
45	Irace	10%
46	Cinogefalo e Macaco	10%
47	Cericopiteco	10%
48	Proscimia	30%
49	Lepre	50%
50	Grande Ottarda	30%
51	Farona	8%
52	Farancolino	8%
53	Fernice	5%
54	Rapaci vari	25%
55	Marabu	50%
56	Sgarza	50%

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda  
(Dr. Cabdullaahi Axmed Caddow)

SHARCI L. 47 Taariikh 18 Agoosto 1981, Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS iyo Hayadda Caalamiga ah ee Horumarinta, kuna saabsan amaah lacageed oo loogu tala galay Mashruuca Tacliinta Afaraad.

### MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Jiigtada ah ee Golaha Shacbiga;

### WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel-marinta heshiiska dhex-maray JDS iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta kuna saabsan amaah lacageed u dhi-ganta 8.000.000 malyun (S.D.R.) oo loogu talo galay Mashruuca Tacliinta Afaraad.
2. Heshiiska waxaa lagu kala saxijxday magaalada Washington, taariikh. markay ahayd 17 Abriile 81.
3. Heshiiska wuxuu ka yahay sharcigan isagoo lifaaq u yahay.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qoddoba-da heshiiska oo lagu tilmaamay Qod. 1aad ee Sharci-gan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka.

— 1385 —

Dhaqan gelintoodana waxaa la waafajinaya Qod. 72 (1) ee Dastuurka JDS iyo qodobbada uu ka saameeyo heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey in uu meel mariyo heshiiska Sharcigan ku tilmaaman sida uu qabo Qod. 82aad ee Dastuurka JDS.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, wuxuuna dhaqan gelayaa maalin-ta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 18 Agoosto 1981

MADAXWEYNAHA JDS  
(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 47 ee 6 Sebtembar 1981, Meel-marin Heshiis:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Amaahda «deyn lam. 1105 so» ee Mashruuca Afraad ee Tacliinta dhexmarayna dawladda Jam. JS iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta, laguna kala saxiixday Degmada Kolombiya ee Dalka Maraykanka 17kii Abril, 1981;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga Qaranka ee Heshiiska taariikhdiisuna tahay 18kii Agosto, 1981.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerkan soo socda:

Qod. 1aad

Heshiiska Amaahda «deyn lam. 1105 so» ee Mashruuca Afraad ee Tacliinta dhexmarayna dawladda JDS iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta laguna kala saxiixday Degmada Kolombiya ee dalka Maraykanka, 17kii Abril, 1981, WAA LA MEELMARI YEY.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelan doonaa JDS astaan sharci ah; wuxuuna dhaqan geli doonaa miarkuu saxiixo Madaxweynaha JDS xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 6.9.1981

MADAXWEYNAHA JDS  
(Maxamed Siyaad Barre)

LAW No. 47 on 6th September 1981, Instrument of Ratification:

THE PRESIDENT SDR

HAVING SEEN: Article 67(5), Article 82(4) and Article 72(1) of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN: The Loan Agreement «Credit No. 1105 so» for the fourth Education Project between the Government of the Somali Democratic Republic and the International Development Association singed at the District of Columbia, USA, on 17th April, 1981;

TAKING NOTE: Of the approval of the People's Assembly of the said Agreement dated 18th August, 1981.

Hereby promulgates the following Decree:

Article I

The Government of the Somali Democratic Republic hereby ratifies the Loan Agreement «credit No. 1105 so» for the Fourth Education Project between the Government of the SDR and the International Development Association, singed at the District of Columbia, USA, on 17th April, 1981.

Article II

This Agreement shall have the force of law in the territory of the SDR; and shall enter into force upon singature by the President SDR.

This Decree shall be published in the Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 26.9.1981.

PRESIDENT OF THE SDR  
(Mohamed Siad Barre)

SHARCI L. 48 taariikh 28 Luulyo 1981, Oggolaansha  
heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Sanduuqa  
Horumarinta Sacuudiga:

**MADAXWEYNAHA JDS**

ISAGOO TIXGELINAAYA: oggolaanshaha Golaha  
Shacbiga;

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Sharciga soo socda:

**Qod. 1aad**

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta heshiiska dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Horumarinta Sacuudiga oo ku saabsan amaaah lacageed oo dhan 33.300.000 / = (soddon-iyosaddexmalyan-iyosaddexboqolkun) Riyaal Sacutidi oo loogu talo galay Mashriuca Sonkorta Jubba.
2. Heshiiskani waxaa lagu kala saxiiday magaalada Riyaad ee Dalka Sacuudi Caraabiya taariikhdu markay ahayd 15 Jun 1981.

**Qod. 2aad**

Shuruudaha iyo xaaladaha uu qorayaan heshiiska lagu soo tilmaamay Qod. 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana la waafajinayaa dhangelintiisa Dastuurka JDS iyo qodobbada uu ka saameeyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey in  
uu meelmariyo Heshiiska Sharcigan lagu soo tilmaa-  
may.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaas isla maalinta  
lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 28 Luulyo 1981

MADAXWEYNAHA JDS  
(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 48 ee 18 Agoosto 1981, Meelmarin Heshiis:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka JDS.

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Amaahda ee Dhammays-tirka Mashruuca Sankorta Jubba, dhexmarayna Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Horumarinta Sacuudiga laguna kala saxiixday Riyaad 13kii Shabcaan 1401 H(15kii Juun 1981).

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga Qaranka ee Heshiiska taariikhdiisuna ahayd 24kii Ramadaan 1401 H (25kii Luulyo 1981).

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerkan soo socda:

Qod. 1aad

Heshiiska Amaahda ee Dhammaystirka Mashruuca Sankorta Jubba, dhexmarayna Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Sacuudiga ee Horumarinta, laguna kala saxiixday Riyaad 13kii Shacbaan 1401 H (15kii Juun 1981), WAA LA MEELMARIYEY.

Qod. 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci wuxuuna u dhaqan gelayaa sida waafaqsan qodobkiisa 6aad.

Qod. 3aad

Xeerkani wux uudhaqan geli doonaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS; waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 18ka Shawaal 1401 H

(18ka Ogosto 1981)

MADAXWEYNAHA JDS  
(Maxamed Siyad Barre)

## جمهورية الصومال الديمقراطية

### الرئيس

قانون رقم ٤٨ الصادر في ١٨ أغسطس ١٩٨١  
وثيقة التصديق

بعد الاطلاع : على المادة ٦٧ الفقرة الخامسة ، والمادة ٨٢ الفقرة الرابعة  
والمادة ٧٢ الفقرة الاولى من دستور جمهورية الصومال  
الديمقراطية .

بعد الاطلاع : على اتفاقية القرض لاستكمال مشروع سكر جوبا بين حكومة  
جمهورية الصومال اليمهيراطية والصندوق السعودي للتنمية  
للتنمية ، الموقع عليها في رياض بتاريخ ١٣ شعبان ١٤٠١ هـ  
الموافق ١٥ يونيو ١٩٨١ م.

بعد الاطلاع : على موافقة مجلس الشعب على هذه الاتفاقية بتاريخ ٢٤  
رمضان ١٤٠١ هـ الموافق ٢٥ يوليو ١٩٨١ م.

### تصدر المرسوم التالي

#### المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية القرض لاستكمال مشروع سكر جوبا المبرمة  
بين حكومة جمهورية الصومال والصندوق السعودي للتنمية الموقع عليها  
في رياض بتاريخ ١٣ شعبان ١٤٠١ هـ الموافق ١٥ يونيو ١٩٨١ م.

#### المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون في جمهورية الصومال الديمقراطية طبقاً  
للمادة السادسة.

#### المادة الثالثة

ينفذ هذا المرسوم حال توقيعه من قبل رئيس جمهورية الصومال  
الديمقراطية وينشر في الجريدة الرسمية للدولة .

في مقديشو ١٨ شوال ١٤٠١ هـ

اللواء محمد سياد بري

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

SHARCI L. 49 Taariikh 23 Agoosto 1981, Oggolaansho  
xisaab xirka miisaaniyadda dhabta ah ee 1980:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Goloha  
Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday xisaab xirka miisaaniyadda  
dhabta ah ee 1980 oo sida ku cad lifaaqyada B & T na-  
tiijadiisu noqotay:

DAKHLIGA GUUD

---

1.— Dawladda Dhexe	=	Shs. 1.421.371.799,46
2.— Dawladda Hoose	= »	76.357.087,13

KHARAJKA GUUD

---

1.— Dawladda Dhexe	= »	1.846.392.089,43
2.— Dawladda Hoose	= »	87.904.357,07 =

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelaya maalinta lagu  
soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 23 Agoosto 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

Lifaaqa B  
KHARAJKA DHABTA AH EE  
D/HOOSE GOBOLLADA 1980.

MADAX	TILMAAN	KHARAJKA DHABTA	AH
2.2.0	Gobolka J/Hoose	4.873.750,80	
2.3.0	Gobolka Baay	5.983.027,22	
2.4.0	Gobolka Bakool	2.519.513,30	
2.5.0	Gobolka Gedo	4.076.831,03	
2.6.0	Gobolka Sh/Hoose	8.690.548,58	
2.7.0	Gobolka Sh/Dhexe	2.226.381,36	
2.8.0	Gobolka Hiiraan	3.561.414,84	
2.9.0	Gobolka G/Gaduud	3.795.513,64	
2.10.0	Gobolka Mudug	4.268.47793	
2.11.0	Gobolka Nugaal	2.439.405,07	
2.12.0	Gobolka Bari	2.941.858,74	
2.13.0	Gobolka Sanaag	2.980.718,99	
2.14.0	Gobolka W/Galbeed	28.280.911,72	
2.15.0	Gobolka Togdheer	9.210.478,87	
2.16.0	Gobolka J/Dhexe	2.055.524,90	
	Isugeyn	87.904.357,07	

DAKHLIGA DHAFTA AH EE D/DHEXE, 1980

Madax Tilmaan iyo Dakhliga dhabta ah

1.1.0	Canshuurta xaraashka	973.362.574,70
2.1.0	Canshuurta wax soo saarka	124.577.987,86
3.1.0	Canshuurta Dakhliga	94.604.882,01
4.1.0	wareejinta kale ee gudaha	7.295..988,43
5.1.0	Dakhiga Hantida	176.153.625,80
6.1.0	Dakhliga Alaabta iyo Hawsha	40.481.909,17
7.1.0	Wareejinta joogtada ah	_____
8.1.0	Gadida Hantida	_____
9.1.0	Wareejinta Raasumaalka	4.894.831,49
10.1.0	Wareejinta Raasumaalka dibedda	_____

Isugeyn: 1.421.371.799,46

DAKHLIGA DHABTA AH EE D/HOOSE:

2.2.0	Gobolka J Hoose	5.073.227,90
2.3.0	Gobolka Baay	3.926.755,60
2.4.0	Gobolko Bakool	1.232.440,50
2.5.0	Gobolka Gedo	3.014.747,90
2.6..0	Gobolka Sh/Hoose	9.417.133,72
2.7.0	Gobolka Sh/Dhexe	3.775.431,11
2.8.0	Gobolka Hiiraan	2.898.188,70
2.9.0	Gobolka G/Gaduud	2.456.091,40
2.10.0	Gobolka Mudug	2.195.554,05
2.11.0	Gobolka Nugaal	1.607.146,15
2.12.0	Gobolka Bari	3.230.798,70
2.13.0	Gobolka Sanaag	1.998.128,00
2.14.0	Gobolka Togdheer	8.574.490,49
2.15.0	Gobolka W/Galbeed	25.255.450,81
2.16.0	Gobolka J/Dhexe	1.701.502,10

sugeyn 76.357.087,13

Lifaaqa T  
KHARAJKA DHABTA AH EE  
DAWLADDA DHEXE 1980

MADAX WASAARADAHA KHARAJKA CAADIGA AH

1.1.0	Madaxtooyada	31.091.496,53
1.1.2	Qorsheynta	3.822.355,27
1.1.3	Booliska	102.578.000,14
1.1.4	Guulwadayaasha	12.751.500,00
1.2.0	Maaliyadda	343.461.9898,96
1.3.0	Arrimaha Dibedda	53.064.596,19
1.4.0	Gaashaandhigga	588.422.992,36
1.5.1	Garsoorka	10.371.920,87
1.5.2	C/Asluubta	42.127.819,12
1.6.0	D/Hoose	25.852.081,37
1.7.0	H/Guud	34.425.151,69
1.8.0	Macdanta	40.883.864,00
1.9.0	Beeraha	77.901.246,52
1.10.0	X/Xoolah	54.690.667,46
1.11.0	Kalluunka	16.155.937,30
1.12.0	Warshadaha	38.365.835,23
1.13.0	Gaadiidka Badda	3.491.710,86
1.14.0	Gaadiidka	40.014.885,13
1.15.0	Boostada	25.064.100,24
1.16.0	Ganacsiga	2.556.750,20
1.17..0	Waxbarashada	151.103.046,58
1.18.0	H. iyo Tacliinta Sare	39.366.111,92
1.19.0	Caafimaadka	74.472.509,15
1.20.0	Isboortiga	5.013.935,.86
1.21.0	Shaqada	4.871.857,06
1.22.0	Warfaafinta	19.967.997,54
1.23.0	Dalxiiska	4.501.730,88

Isugeyn: 1.846.392.089,43

SHARCI L. 50 ee 20 Luulyo 1981, Meelmarin Dastuurka (UNIDO):

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 67 (5), Qod. 82 (4) iyo Qod. 72 (1) oo Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Hey'adda Caalamiga ah ee Horumarinta Warshadaha (UNIDO) isuguna oggolaaday magaalada Viyana ee dalka Ustraaliya 8dii Abriil, 1979.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga ee Dastuurka (UNIDO) taariikhdiisuna ahayd 21kii Maajo, 1981.

Wuxuu soo saaray aaXeerkan soo socda:

Qodobka 1aad

Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay meelmarisay Dastuurka Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta Warshadaha (UNIDO) laguna oggolaaday magaalada Viyena ee dalka Usteriaya 8dii Abriil, 1979.

Qodobka 2aad

Dastuurku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah wuxuuna u dhaqan gelayaa sida waafaqsan qodobkiisa 24aad, xubintiisa 2aad.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan geli doonaa taariikhda uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Fafinta Rasmiga ah oo Dawladda.

Muqdisho 20.7.1981

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre  
Madaxweynaha

LAW No. 50 on 20th July 1981, Instrument of Ratification of the United Nations Industrial Development Organization:

HAVING SEEN: Article 67 (5), Article 82 (4) and Article 72 (1) of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Constitution of the United Nations Industrial Development Organization, adopted at Vienna, Austria, on 8th April, 1979.

TAKING NOTE: Of the approval of the people's Assembly of the said Constitution dated 21th May 1981. , „ ,

Hereby proculgatos the following Decree:

### Article I

The Government of the Somali Democratic Republic hereby ratifies the «Constitution» of the United Nations Industrial Development Organisation, adopted on 8th April, 1979, at Vienna, Austria.

### Article II

This Constitution shall have the force of law in the territory of the SDR in accordance with its Article 24(2).

### Article III

This Decree shall enter into force by the President of the SDR and the Official Buletin of the State

MAJOR GENERAL

MAJOR GENERAL

MAJOR GENERAL

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO  
(MIS. APPLICATION) LAMBAR 2.81

DIKRETA (DEECRE)

GUDDOOMIYAH MAXKAMADDA

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cali Ibraahim Liibaan ay uu ku sheegaayo in Jeegga War. L. Yà. 509135 lacagtiisuna tahay 6000/= loona sameeyay taariikh 7.1.81 uu ka lumay uuna sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka laanta Burco, oo ay hubiyeen in Jeeggaasu lumay;

MARKUU ARKAY : Dacwooduhu in doodiisu run tahay isla markaasna aan arkay Qod. 27 ee xeerka sumaddiisu tahay 2 soona baxay 9.9.65.

Ayaan guddoomiye in Jeegga Wareega L.Y. 509135 lacagtiisuna tahay 6000/= (lix kun oo shilin) inuu baabi'yo Bankiga Ganacsiguna laanta Burco u celiiso lacagtaas ku qorhayd, 30 caasho ka dib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah, kharajkana dacwooduhu is-ka bixinaayo.

Maanta oo taariikhdu tahay 28.6.81

GUDDOOMIYAH MAX. G. TOGDHEER BURCO  
(Dr. Dayib Sh. Abuukar)

OGG: BANKIGA G. UMMADDA, LAANTA BURCO  
OGG: Cali Ibraahim Liibaan, Burco